

## **Isbuuclaha BSD ee - Janaayo 18, 2021**

### **Janaayo waa Bisha Aqoonsiga Gudiga Iskuulada**

BSD gudaheeda, waxaan aad ugu nasiib badanahay inaan heysano toddobo xubnood oo ah gudiga iskuulada ee mutadawiciinta ah ee u heelan inay ka caawiyaan arday kasta inuu gaaro awoodooda buuxda: Gudoomiye Becky Tymchuk, Kuxigeenka Tom Tom Collett iyo xubnaha Anne Bryan, Susan Greenberg, LeeAnn Larsen, Eric Simpson iyo Donna Tyner. Go'aannada xubnaha guddigu la kulmaan caqabado adag, gaar ahaan sannadkan. Waxay tabarucayaan boqolaal saacadood, iyagoo siinaya qaab-dhismeedka waxbarasho ee ugu wanaagsan uguna macquulsan ardaydayada ku dhow 40,000. Bishan, waxaan aqoonsannahay waxtarkooda muhiimka ah iyo doorka muhiimka ah ee ay ka ciyaaraan waxbarashada carruurteenna. Mahadsanidiin, xubnaha guddiga!

### **Naadiga Kinnaman ee 3D waxuu Dhisaa Bulso**

Hormuud ka ah macalinka Dugsiga Hoose ee Kinnaman Evans Reed, Naadiga 3D wuxuu kulmiyaa ardayda xiisaysa daabacaadda 3D. Ardaydu waxay kulmaan usbuuciiba mar si ay u bartaan sida loogu naqshadeeyo looguna dhiso moodooyinka 3D kombiyuutarka. Mudane Reed wuxuu markaa daabacaa moodooyinka oo wuxuu u qaybiyaa ardayda. Naadigaani wuxuu ahaa waddo wanaagsan oo lagu dhiso isku xirnaan iyo bulsho inta lagu jiro barashada fog. [https://youtu.be/L-HckB\\_WPcc](https://youtu.be/L-HckB_WPcc)

### **Dugsiga Dhexe ee Meadow Park Qalabka Jimicsiga(PE) ee-Guriga**

Deyrtan, kooxda P.E. ee Dugsiga dhexe ee Meadow Park ayaa aruurinayey deeqaha qalabka isboortiga si loogu qaybiyo ardayda. Waxaa hogaamineysa macallimad Jennifer Hoffman, iskuulku wuxuu soo uruuriyay xirmooyin ay ka mid yihiin xargaha lagu boodo, kubbadaha lagu cayaaro, xargaha la jijiido iyo waxyaabo kale oo badan. Intaas waxaa sii dheer, manhaj online-ka ah ayaa la sameeyay si loo muujiyo inaad isticmaashay qalabka. <https://youtu.be/SY0Ke7odLaM>

### **Xusuusin: Arbacada waa Maalin Barasho ee Jadwal Joogto ah**

Iyada oo maanta ay tahay maalin fasax ah oo aan iskuul jirin, Arbacada, 20-ka Janaayo waxay noqon doontaa Maalin Barasho oo Jadwal Joogto ah. Fadlan calaamadee jadwalkaaga.

### **Miisaaniyadda - Waxaan Rabnaa Jawaab Celintaada**

Iyada oo qayb ka ah hanaanka miisaaniyada ee sanad dugsiyeedka 2021-22, waxaan raadineynaa ra'yigaaga. Fadlan sii daqiiqado yar si aad u daawato bandhigan fiidiyowga ah ee Kormeeraha Guud Mike Schofield. Kadib buuxi xog-uruurinta gaaban ee hoose. Maalinta ugu dambeysa ee soo gudbinta fikradahaaga waa Febraayo 1 illaa 5 p.m.

<https://youtu.be/JT9iJhOAzO8>

[Mudnaanta Miisaaniyadda iyo Ra'yiga 2021-22](#)

### **CTE - Waxbarashada Farsamada ee Xirfadeed**

Barnaamijyada CTE waxay ardayda dugsiga sare ka qaybgeliyaan fasalo tayo sare leh, adag oo ku haboon, oo loogu talagalay inay ka caawiso inay damacyadooda u beddelaan mushaar iyo riyadooda shaqooyin. Barnaamijyada CTE waxay iskaashi la yeeshaan ganacsiyada maxalliga ah iyo warshadaha si loo abuuro fursado dhiirrigeliya hal-abuurnimo, hindisaha iyo hoggaaminta, kuwaas oo ku habboon suuqa shaqada ee maanta.

Waxaan aburnay fiidiyowyo taxane ah, oo cinwaankoodu yahay "Grads Talking Shop" si aan u iftiiminno qaar ka mid ah barnaamijyada 32 CTE ee ka socda lixdeena dugsi sare ee dhammaystiran iyo hal dugsiga sare oo ikhtiyaar ah. Qeybtan "Grads Talking Shop," waxaan ku sahamin doonnaa adduunka Tikniyoolajiyadda baabuurta iyadoo loo marayo indhaha Kristin Keppner, oo ah arday ka soo qalinjabiyey barnaamijka BHS iyo Auto Tech. inkastuu ku yaalo Aloha High School, barnaamijka CTE Auto Tech waxaa heli karo ardayda ka socota mid ka mid ah dugsiyadeena sare ee dhameystiran. Gaadiid ayaa la bixiyaa. <https://youtu.be/EHtc-jlzunM>

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada CTE, fadlan booqo bogga la cusbooneysiisay: <https://www.beaverton.k12.or.us/cte>